SI DEGDEG AH HA LOO SII DAAYO
8dii May 2019
Kala soo xidhiidh: Eric Naing, eric@muslimadvocates.org

Shaqaalaha Muslimiinta Oo Xareeyay Dacwad Takoor ah ay ku Takoortay Amazon

Shaqaalaha Minnesota oo ka shaqeeya Warehouseka, waxay ka codsanayaan EECO iney wax ka qabtaan takoorka Muslimiinta iyo Cadaadiska lagu hayo.

WASHINGTON, DC- Isnintii, waxey saddex dumar oo Somali Muslim ahi xareeyeen dacwad ay u soo jeediyeen (EEOC) Equal Employment Opportunity Commission- oo u taagan Komishanka Sinaanta Shaqaalah, kuna dacweynayaa Amazon warehouseka ku yaala Shakopee.
Waaxda shirkadan ee Minnesota joogta waxay ku xad dugubtay (civil rights) shaqaalaha. Dambigana waxaanu ku soo oogney in shirkadani ku xad gudbtay Title VII, oo ay u diiday ama u fududeyn wayday in diintooda waajibkii ka saarnaa gutaan, Shaqaalah Somalida ah oo la dalacsiin waayo, iyo in la cadaadiyo markey ka qeyb qaataan banaan baxyadda takoorka ku saabsan.

Shaqaalaha ka shaqeeya Warehouse ku yaala Shakopee waxay ku dacwoonayaan in la siin waayay meel iyo wakhti ay ku tukadaan si ay diintooda waajibka ka saran uga soo baxaan. Waxay kale ee ay ku dacwoonayaan in shaqaalaha Somalida ah aan si sinaan ah shaqada loo wada siin, oo dadkaa kale la dalacsiiyo, markay maamulka u sheegaana in aan waxba laga dhageysan. Waxa kale oo ay ka qeyb qaateen banaan baxyo lagaga hadlayay dhibaatooyinka meesha ka jira oo ay ka mid tahay takoorka, ka dibna in markay shaqada ku soo noqdeen lagu bilaabay cadaadis, warqado laga qoro, digniinyo la siiyo, qaarna la eryayba.

“Totobaadkii labaad kadib markaan shaqada Amazon bilaabay, Ayaa layga qorey warqad dhahaysa rateka intii laga rabey maad keenin. Taasina waxay ugu qasabtay inaan qaadan wax bareeg ah, oo aana salaada dib uga dhaco oo aanan xitaa musqusha aadin si aan u keeno rateka ay iga rabaan, mar dabna warqad la iiga qorin” sidaa waxaa tedhi **Ms. B** oo ku dacwooneysa.

Sidoo kale dacwadani waxay ku eedayneysaa inay Amazon sameysay takoor ay ku kala sooceyso shaqaalaha, waxay sameysay laba-waxood oo ay ku kala soocdo shaqaalaha, taasina waxay keentay in shaqaalaha qaarkood u tabo baran shaqooyin, lana dalacsiin, mushaharkana loo kordhin lagana hor mariyo shaqaalaha cadaanka ah, loona dhiibo shaqooyinka aadka u ad-adag.

“Iyada oo shaqaalaha cadaanka ah la siiyo shaqooyinka fiicfiican lana dalacsiiyo, loona tabobaro meelaha kale sida, shipment packerka, jaanisyadan noocaada lama siiyo dadka madowga muslimka ah ama Somalida ah oo aan anuu ka mid ahy. Laakiin Amazon waxay rabtaa in Somalidu ay ku ekaadaan packingka waliba packaingka alaabaha culculus”
Sidaa waxa yedhi **Ms A.**

Ugu dabeystii, dambeyada aan ku soo oogney Amazon oo ku saabsan shaqaalaha Musliinta ah ee ka qeyb qaatay banaanbexii dhacay Desember 14dii 2018 oo lagaga hadlayay dhibaatooyinka takoorka ee ka dhaca Amazon xarunteeda ku taala Shakopee. Markii ay ka qeyb galeen ka dib ka saddexdan dumarba waxay sheegiin iney la kulmeen cadaadis fara badan, oo ay ka mid tahay in shaqooyin culus loo dhiibo, kormeero dheeraad ah lagu sameeyo, iyo ciqaabyo ku soo kordhay.

“Banaanbaxa ka dib, waxaa la bilaabey in si adag la’iila dhaqmo, warqado layga qoro oo la leeyahay ratekii laga rabey maad keenin, inkasta oo aan barigii hore xitaa aan keeni jeray ratesyo hooseeya laakiin aan laygu ciqaabi jerin” sidaa waa tedhi **Ms.C.**

Saddexdan dembi oog ee aan ku soo qaadeyno Amazon waxay kuu cadeynayaan in ay ka jirto takoor lagu hayo shaqaalaha Musliimnta ah ee Somalida ah ee waliba Afrikada Bari in lagu xad gudbay xaquuqdoodii Title VII iyo tii Civil Rights ee la ansixiyay 1964.

“Ma’aha in shaqaaluhu suu’liga gali kari wayaan ama uu ka cabsado inuu salaad tukado ama la cadaadiyo haddi uu banaanbaxo oo uu xaqiisa shaqada ku saabsan u dodo”. Sidaa waxaa tedhi **Sirine Shebaya, oo ah tabobare Directorka Muslim Advocates.** “Macaameeshayadda waxay la kulmeen takoor shaqaale oo lagu takoorayo Jinsiyadooda, diintooda iyo meeshay ka soo jeedaan. Waxaanu rajeynaynaa in EEOC si adag oo hufnaan ku jirto oo waliba ay degdeg baadhitaan ugu sameyso xad gudubkan Title VII ah.”

“Xad gudubkan iyo takoorkan ay la kulmeen dumarkani oo ay ku tilmaameen wax aan loo adkeysan Karin oo waliba aan ahyn wax Mareykanku ku dhaqmo” Sidaa waxaa yedhi **Abdirahaman Muse oo ah Mamulaha Awood**. “Aad Ayaan ugu faraxsanahay dumarkan geesinimadda muujiyay oo edinla wadaagay sheekadooda si ay uga dhigaan Amazon meel nabad galyadeedu u fiican tahay oo dadka oo dhan ka siman yehiin oo aan ku koobnayn Muslimiinta oo kaliya”.

“Macaameeshayada waa lagu xad gudbay, oo la ilaashaday, waa la takooray waxaana sabab looga dhigay takoor jinsi, diineed iyo meeshay ka soo jeedaan, Sidaa waxaa tedhi **Nimra Azmi, oo ah Muslim Advocates,** “Amazon ma’aha inay aqbasho takoorka shaqaale meeshay doonto ha ahaatee, xaruntay doonto ha ahaatee.

“Dumarka Muslimiinta ee Madow waxay u sahlayehiin in ay kulmaan takooryo kala duduwan kuwa shaqo iyo kuwa kalaba.” Sidaa waxaa tedhi **Nabihah Maqbool, Sinaanta Jinsiyadaha ee Muslim Advocates**. Aad ayay muhiim u tahay in arinkan wax laga qabto loona xaliyo si habeysan oo caalami ah.

Muslim Advocates waa haayad calami ah oo u dooda xuquuqda oo qaab maxkamadeed ah, marka laga eego awooda iyo bulushada waxaan raad ka dhiganaa la xisaabtan. Waxaan hubineynaa in Muslim kasta oo Ameerikaan ahi uu helo cod matala iyo cid aqoon leh oo matasha si Mareekaankasta oo Muslim ahi ugu noolaado nolol xor ah oo aan lahayn naceyb iyo takoor midna

###